

SHAQAALEYSIINTA KORMEERAHA GUUD

Gudiga Waxbarashada waxoo aqoonsan yahay in shaqaaleysiinta iyo magacaabista Kormeeraha Guud ee Dugsiyada ay ka mid yihiin mudnaanta ugu muhiimsan ee Gudiga.

Iyadoo loo maraayo siyaasadaheeda shaqo, Gudiga waxoo isku dayi doonaa inoo soo jiito, sugo, iyo sii haysto Kormeere Guud oo aqoon leh. Barnaamijka xulashada waxa uu ku salaysnaan doonaa in la helo shaqsi u heelan waxbarashada iyo daryeelka caruurta dhigato dugsiyada Degmada, iyo maamulka hufan ee xilkasnimada leh ee nidaamka dugsiyada.

Gudiga waxaa laga yaabaa inee dhisaan gudi goobeeyo ama ay kiraystaan lataliye si ay u shaqaaleysiiyaan iyo u waraystaan murashaxiinta jagada Kormeeraha Guud. Waajibaadka gudiga goobeeynta ama lataliyaha iyo habka la raacaayo waxaa si cad u dejin doono Gudiga ka hor inta aan la bilaabin habka shaqaaleysiinta. Gudi hadii la doorto, waa in ay qaataan tababar si hab socodka ay ugu qabtaan si hufan. Gudiga waxay dooran karaan inay iskeed isku dhiso gudi ahaan. Gudiga waxaa kale oo laga yaabaa inay raadiyaan talada iyo latalinta shaqsiyaadka danaynaayo ee la xiriiro magacaabista Kormeeraha Guud. Si kastaba ha ahaatee, doorashada kama dambaysta ah waxaa lahaan doono Gudiga ka dib marka si qotodheer loo tixgeliyo musharaxiinta u qalmo.

Nidaamyada shaqaaleysiinta waxay awood u siin doontaa Degmada in ay raadiso musharixiin u qalmo dhinacyo kala duwan. Gudiga waxay u hogaansamaan dhaqanka qorista iyo shaqaaleysiinta shaqaalaha iyada oo aan loo eegin diinta, jinsiyada, caqiidada, midabka, asalka qaranka, jinsiga, galmada, heerka guurka, ama naafanimada. Waxay noqon doontaa mas'uuliyada gudiga ama lataliyaha si ay u go'aamiyaan in murashaxiinta ay la kulmaan shahaadada iyo shuruudaha kale ee lagu dejiyay Sharciga Waxbarashada iyo Xeerarka Gudoomiyaha Waxbarashada ee jagada Kormeeraha Guud.

Gudiga waxoo qandaraas kala xaajoon doonaan musharaxa ku guuleysto.

Tixraac: Sharciga Waxbarashada §§1711(1), (2), (3)
8 NYCRR §80.4

Qoraalka: Siyaasadii hore, Buuga Siyaasada, CBB; Dib loo eegay Ogosto 20, 1998; Wax laga bedelay Abriil 27, 2023 iyadoo la raacayo Qaraarka No. 2022-23: 627

ct/sg